# WAR SAXAAFADEED

**Tixraac: Boorarka ku saabsan Wadajirka Bulshada**

21-ka JANNAAYO 2020

Toddobadii iyo sagaalkii bishii July 2019 ayaa Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu horyaal kubbadda cagta ah u qabtay 40 dhallinyaro ah oo ka tirsan dadka barakacu saameeyay iyo bulshada martigelisay ee ku nool degmooyinka Kaxda iyo Dayniile. Intii ciyaartu socotay ayaa, Alle ha u naxariistee Duqii Muqdisho Mudane Cabdiraxmaan Cumar Cusmaan, kulan la yeeshay ka qaybgalayaashii horyaalka iyo xubnaha kale ee bulshada. Dadka barakacu saameeyay iyo danyarta magaaladu waxa ay si isku mid ah Duqa (AHUN) ula wadaageen arrimaha hortabinta u leh, Duquna waxa uu dhallinyarada kula taliyay inay hormuud ka noqdaan inay u doodaan una qareemaan naftooda, qoysaskooda iyo baahiyahooda.

Horyaalka waxa xogtiisa lagu kaydiyay qoraallo, sawirro iyo muuqaallo. Mid kasta oo kamid ah sawirrada iyo muuqaallada aan dadweynaha la wadaagnay waxa la adeegsaday iyada oo oggolaansho laga haysto dadka ay qusayso. Sidoo kale, waxa aan go'aansannay inaan qaar kamid ah sawirrada uga faa'idaysanno baraheenna bulshada, warbixinnada iyo boorarka aan ku dhejinno magaalada si aan u soo bandhigno aragtida aan aaminsannahay ee ku aaddan in Barakacayaasha Guduhu ay qayb ka yihiin magaalada, Muqdishana ay dhammaanteen hoy inoo tahay maadaama ay caasimaddii dalka tahay, iyo in wadajirka shacabka oo lagu laray isdhexgalka Barakacayaasha Gudaha iyo bulshadu ay muhiim u tahay horumarkeenna.

Waxaa na soo gaartay in mid kamid ah ka qaybgalayaashii horyaalka oo lagu magcaabo **Maxamed Ismaaciil,** kaasi oo sawirkiisa loo adeegsaday boorarka, aanu ku faraxsanayn adeegsiga sawirkiisa—isaga oo sheegay in ay ka maadaysanayaan saaxiibbadii iyo qoyskiisu isla markaana loogu yeerayo 'Barakace', waxa uuna caddeeyay inuu dhab ahaan ka tirsan yahay bulshada martigelisay barakacayaasha.

Ceebaynta iyo maadaygsiga la soo gudboonaday Maxamed waa isla sababta ay muhiim u tahay in wax laga qabto, baaritaan dheeraad ahna lagu sameeyo arrimaha la xiriira wadajirka bulshada iyo isdhexgalka dadka uu barakacu saameeyay iyo bulshada inteeda kale. Quursiga lagula kaco Barakacayaasha Guduhu waa mid xaqiiq ah, waloow aynu dhammaanteen Soomaali iyo Muslimiinba nahay, haddana taasi ma hor istaagin faquuqa iyo xaqiiqooyinka ay waajahayaan qaar kamid ah dadkeenna.

*Wadajirka bulshada iyo isdhexgalka maaha in loo arko hannaan keliya u dhexeeya bulshada. Isdhexgalka waa in laga fiiriyaa dhinacyada siyaasadda iyo dhaqaalaha, maadaama ay taasi saamayn ku leedahay siyaasadda dowladda.*

**Aad ayaan uga xunnahay culayska Maxamed kala soo gudboonaaday boorarka, waxa aanuna qaadi doonnaa tallaabooyinka ku habboon si aan wax uga qabanno cabashadiisa.** Unugga Xalalka

Waara iyo shirkadda ARTCH (oo qaabbilsan la-talinta dhanka warbaahinta iyo warfaafinta) waxa ay caddaynayaan in sawirrada lagu helay oggolaanshaha kooxaha iyo tababbarayaashooda, waxaana jira muuqaal-sawirreed muujinaya dhacdooyinkii maalintaas oo iftiiminaya ka qaybqaadashada Maxamed iyo kooxdiisa iyaga oo raalli ah.

Ka dib markii uu soo baxay qoraalka Maxamed ee barta Twitter-ka, maamulka ARTCH waxa u suurtagashay inay xiriir la sameeyaan Maxamed oo sheegay inuu dhibsaday sida qoraalka boorka loo dhigay iyo sida loola xiriiriyay Barakacayaasha Gudaha.

Ka dib wadahadalkaas, ARTCH waxa u suurtageli weydey inay helaan Maxamed. Sidaasi darteed, annaga oo ah maamulka Unugga Xalalka Waara iyo ARTCH Ka dib markii aan aragnay video-gii Maxamd ee uu ku codsnayey in Sawirkiisa laga dejiyo boorarka magaalada. Waxaan go'aansanay in aan sawirkiisa ka dejin muddo 48 saacadood gudahooda ah.

Mar labaad, waxaan ka xunnahay dhibaatada Maxamed kala soo gudboonaatay boorarkeena iyo qibrada aan wanaagsanayn ee kala soo gudboonaatay, waxaana u rajeyneynaa wanaag Maxamed waa wiil yar oo xariif ku ah kubadda kaasoo leh mustaqbal wanaagsan oo ifaya.

Falcelinta na soo gaartay ka dib, waxa aan idinka codsanaynaa in marka aad ag maraysaan boorarkeenna aad ka fekertaan, dib u milicsataan isla markaana qoysaskiinna, saaxiibbadiinna iyo shaqa-wadaagtiinna kala sheekaysataan eexda iyo afkaarta qaldan ee laga yaabo inaan ka haysanno barakacayaasha, iyo inaad ka fekerto nolosha maalinlaha ah ee Barakacayaasha Gudaha,iyo sidii aad u caawin lahayd qoysaska baahan.

Mahadsanidiin,

Dr. Hodan Cali BScN, MSc-PHC, DNP

Isu-duwaha Unugga Xalalka Waara
ee Gobolka Benaadir

Cabdisalaam Caato

Agaasimaha Shirkadda Warbaahinta ee ARTCH